

POLIZEI 



HATE  
CRIME

Weligaa dhibane  
maku noqotay  
dambi nacayb?  
Ogow  
xuquuqahaaga!

## Waa maxay dembiga necaybka?

### Qof kasta ayaa dhibane u noqon kara dembiga necaybka!

Denbiilayaashu waxay dhibanayaashooda iyo/ama bartilmaameedyadooda u doortaan si ula kac ah. Waxay weeraraan dadka iyo walxaha metela kooxaha ay ka soo horjeedaan.

#### Dembiyada necaybka:

- waa dambiyo ciqaab lagu mutaysan karo.
- badanaa waxaa lala beegsadaa nafta, hantida ama sharafta dhibbanaha.
- waa dambiyo loo geysto dadka leh **astaamo** lagu garto.
- waxay fariin necayb ah u diraan kooxda isku aqoon-siga ah ee ka soo jeedo dhibanaha.
- waxay noqon karaan hadalada necaybka ee aan khadka la soo dhigin ama qoraalada necaybka ee internetka la soo dhigo.



⌚ Cuqdada waxaa lagu qeexaa inay tahay dabeeecad cadownimo leh oo lagula kaco dhibanaha

⌚ iyada oo lagu salaynayo inuu dhab ahaan uga tirsan yahay ama loo maleynayo inuu ka tirsan yahay

⌚ koox la ilaaliyo

## Maxaa samayn karaa?

Diiwaanada wanaagsan waxay booliska iyo maxkamadaha ka caawiyaan **inay ogaadaan oo ay baaraan dembiyada nacaybka**, waxayna muhiim u yihiin qorshaynta iyo **talaabo** qaadista si looga hortago dambiyada nacaybka ee mustaqbalka.

- Haddii aad dareento hanjabaad daran, wac 133. Booliisku wuxuu sameyn doonaa wax kasta oo lagama maarmaan u ah si ay kuu difaacaan.
- Haddii lagu dhaawaco, raadso daaweyn caafimaad oo xaqiji in dhaawacyadaada si habboon loo diiwaangeliyo.
- Dembigaa ku wargeli saldhigga booliska. Markhaatiyyasha ayaa sidoo kale ka warbixin karaan dambiyada.

### Sida aad nooga caawin karto qabashada dembiilaha

#### Isku day inaad ogaato:

- taxanka dhacdooyinka dhacaya kahor, inta lagu jiro iyo kadib dembiga, iyo waxyeelada uu dembiga geysatay.
- faahfaahinta muuqaalka dembiilaha iyo dharka ay xirnaayeen, iyo sidoo kale wixii astaamo ah ee lagu garan karo (qaabka timaha, tatooyada, ookiyaale iwm).
- sida uu dambiilaha uga tagay goobta (baabuur, baaskiil, tareen, iwm), iyo wadada ay ku baxeen.
- faahfaahinta laga xiriiri karo markhaatiyal kasta oo diyaar u noqon doona inay nooga warramaan wixii ay arkeen (magacyada, lambarrada taleefannada, iwm.).

## Sifooyinka la ilaaliyo



Xuquuqahaaga dhibbane dembi ahaan (Qeybaha 66 iyo seqq., Xeerka Habraaca Ciqaabta ee Austria/[Strafprozessordnung - StPO])

Dhammaan dhibanayaashu waxay xaq u leeyihii in lagu qiimeeyo fursadda ugu horreysa si loo go'aamiyo in ay heli karaan ilaalo sharci oo gaar ah iyo in kale. Haddii, ka dib markii qiimeyn lagu sameeyo, da'da dhibbanaha, caafimaadka jir ahaaneed ama maskaxeed, dabciga iyo darnaanta dembiga iyo/ama duruufaha gaarka ah ay muujiyaan inay nugul yihiin, waa in si dhakhso leh loo arkaa inay u baahan yihiin ilaalo gaar ah oo sharciga waafaqsan.



## **Qodobbada sharciga ee asalka u ah qeexidda dembiga nacaybka**

### **Ka Been Sheegid - Qaypta 115 (3) ee Xeerka Dembiyada Austria (Strafgesetzbuch - StGB), iyadoo lala xiriirinayo Qaypta 117 (3) StGB**

Qofka waxaa lagu xukumi doonaa inuu geystay qadaf haddii uu, meel fagaare ah ama dhowr qof hortooda, uga dhaartay, ku jeesjeesay ama jir ahaan ugu xadgudbo qof kale, ama ugu hanjabo xadgudub. Haddii shaqsi lagu xanto/qafado inuu ka tirsan koox gaar ah, kiisaska noocaas ah waxaa dabagal ku samaynaya hay'adda ay khuseyso iyadoo raacaysa awoodaha la siiyay. Ficil ahaan, tani waxay ka dhigan tahay in booliisku ay xaq u leeyihiin inay soo farageliyaan kiisaska noocaas ah iyagoo isticmaalaya hal-abuurkooda.

### **Gardaro - Qaypta 283 StGB**

Qof kasta oo, meel fagaare ah ama dad badan hortooda, ugu dhawaaqa rabshad ama nacayb ka dhan ah dadka kale isagoo ku saleynayo jinsigooda, midabkooda, luqaddooda, diintooda, aragtidooda siyaasadeed, dhalashadooda, abtirsiimadooda, dhalashadooda ama asalkooda, jinsigooda, naafonimadooda jir ahaaneed ama maskaxeed, da'adooda, ama aqoonsigooda galmaada, waxaa loo qaadan doonaa inay kaceen gardaro. Sidoo kale, haddii kooxahan ama mid ka mid ah xubnahooda gaarka ah, loo aflagaadeeyo qaab sharaf dhac ah iyo/ama si fagaare ah loo bahdilo, ficolkaas oo kale ayaa sidoo kale loo arkaa inuu yahay gardaro.

### **Xaaladaha sii xumeebynaya dembi - Qeypta 33 (1) (5) StGB**

Iyadoo la tixraacayo xukunka, cunsuriyad kasta, ajnabi nacayb ama wixii kale oo arrintaas dhiiragelinaya waxaa loola dhaqmi doonaa inay yihiin xaalad sii xumeyneysa dembiga, gaar ahaan haddii lagula kaco mid ka mid ah kooxaha ku xusan Qeypta 283, ama shaqsi xubin ka ah kooxdaas.

## **Caawinaad, talo iyo taageero**

### **Dembiyada nacaybku kaliya qofka uga tagaan nabarrada jirka.**

Dadka ay saameysay dembiyadaas badiyaa waxay dar-eemaan sharaf dhac, soo dhaweyn la'aan, cadaadis ama xaqiraad, waxayna waayaan dareenka ah inay amni hays-taan. Dhibbanayaasha dambiyada nacaybka ayaa inta badan waxay la kulmaan saamayn xagga nafsaaniga ah oo muddo dheer, mararka qaarkoodna waxay falcelin ahaan u qariyaan naftooda is ay iska dhigaan kuwo aan la arki karin si ay naftooda si ay uga badbaadaan in la soo weeraro.

#### **Xageen ka heli karaa talo iyo taageero?**

- Adeegyo kala duwan oo taageero iyo talo ah ayaa loo heli karaa dhibbanayaasha, oo ay ku jiraan "Opfer-Notruf" (Lambarka Gurmadka ee Dhibanaha), oo laga heli karo **0800 112 112**  
<https://www.opfer-notruf.at>  
Adeeggan ka socda Wasaaradda Caddaaladda waxaa gacanta ku haya Weisser Ring (White Ring) oo ah taageerada.
- Booliisku ayaa kula xiriirin kara adeegga haddii aad rabto inaad isticmaasho.

#### **Daabac**

Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Austria, Herrengasse 7, 1010 Vienna  
Waxa daabacay: Xarunta Daabacaadda Dijitalka ee Wasaaradda Austria, Vienna, 2021  
[bmi.gv.at](http://bmi.gv.at)



ISRAELITISCHE KULTUSGEMEINDE WIEN



Mashruucan waxaa maalgaliyay Barnaamijka Xuquuqda, Sinnaanta iyo Jinsiyadda (REC) ee Midowga Yuru (2014-2020).